

MUDADA FIKRADAHA DADWAYNAHA
HADDA WAA FURAN TAHAY!
BAYAANKA SAAMAYNTA DHIBAATADA
BII'ADA EE QABYO QORAALKA AH



Bulshada Teufel Nursery iyo
Lakeside intii lagu jiray
Daadadkii Janaayo 1996.



QORSHAHA MAARAYNTA KHATARTA DAADKA EE MARINKA LOWER GREEN RIVER

**Xaashida Xaqiiqada ee Bayaanka
Saamayna Deegaan Barnaamijka ee
Qabyo-qoraalka**

Maarso 2023

KHATARTA DAADADKU WAA DHAB

Lower Green River waxay ku jirta khatarta daadad. Daadadku waa halis waana kuwa geysta burbur. Waxay khatarta ku yihiin amaankeen, waxay xaniibaan isku socodka dadka iyo alaabaadka, waxyeeladaan deegaanka, oo waxay keenaan waxyeelo aad u daran.

Xarunta Xakamaynta Daadadka ee Degmada King (Degmada) waxay ilaalisaa dadka, hantida, iyo bulshooyinka si ayna usoo gaadhin waxyeelada saamaynta daadadka ah. Degmadu waxay doonaysaa inay xaqiijiso in Lower Green River Corridor ay noqoto meel amaan ah oo lagu noolaan karo, laga kaluumaysan karo, shaqayn karo, beeran karo, oo ay ku ciyaari karaan jilashada soo socdaayi.

Daadka ayaa khatarta gelinaaya kudhawaad 14,600 guryaha la dagan yahay ah, 42,200 shaqo, bakhaaro, beero, jardiinoyin, iyo goobaha dabiiciga a oo ilaaliya salmon ka sii dabar go'aaya.



Daadkii ka dhacay Horseshoe Bend sanadkii 2006.

FAA'IIDOOYINKA IYO SAAMAYNADA QABTO QORAALKA PEIS

Hase yeeshee, dhamaan sadexda qaab waxay si awood leh u yareyn doonaan khatarta fatahaadaha inta goobo badan inta lagu guda jiro fatahaadaha waawayn. Sabab la xariirta in daadku yahay nidaam dabiici ah oo aan meesha lag saari karin, daadka ayaa sii jiri doona, inkastoo la yareyn karo.

Arimaha ugu waawayn ee dhanka bii'ada ee looga hadlay qabyo qoraalka PEIS ayaa quseeya saamaynta ka imaan karta xarumaha cusub ama la dayactiray ee maaraynta daadadka, kuwaasoo bixinaaya fursado kor loogu qaado nololaha kaluunka Salmon, laguna fahmaayo saamaynta ay ku leeyihiin manaaficda badan ee dhulka, difaacayana dhul beereedka.

Xog dheeri ah ayaa laga heli karaa LowerGreenSEPA.org



LOWER GREEN RIVER CORRIDOR QAABABKA KALE EE QABYO QORAALKA PEIS

1 DHAQAN GELINTA FAA'IIDOOYINKA BADAN EE MASHRUUC KASTA

- Ma jirto Qorshe Maamulida Waxyeelada Daadka oo aag u gaar ah
- Waxay u eegaysaa mashruucyada mid iyo markiisa; mana samayso qaabka marinka guud si loo yareeyo daadadka
- Yaree saamaynta ku dhaca guryaha la dagan yahay.
- Mashaariicda ayaa faa'ido u leh bulshooyinka iyo deegaanka

2 DHAQAN GELINTA FAA'IIDADA BADAN EE NIDAAMKA

- Waxay abuuraysaa Qorshaha Maareynta Khatarta Daadadka ee Gaarka u ah meel ee cusub
- Waxay adeegsataa qaabka marinka guud si ay u qorsheyso mashaariicda
- Mashruucyada ayaa saamayn kara qaar kamid ah dhismeyaasha xaafadaha si loo baxsho difaaca daadadka iyo faa'idooyinka kale
- Muujinta sida loo dhaqan gelinayo mashaariicda keenaya faa'idooyinka bulshooyinka iyo deegaanka, oo ay ku jiraan ilaalinta iyo soo celinta noolaha aaga wabiga.
- Waxay adeegsan karaan xaqiijinta daadka si loo yareeyo waxyeelada

3 DHAQAN GELINTA FAA'IIDOOYINKA BADAN EE CASRIGA AH

- Waxay abuuraysaa Qorshaha Maareynta Khatarta Daadadka ee Gaarka u ah meel ee cusub
- Waxay adeegsataa qaabka marinka guud si ay u qorsheyso mashaariicda
- Mashruucyada ayaa saamayn kara dhismeyaasha dariska ah oo badan ayagoo difaaca daadka iyo faa'idooyin kale siinaaya
- Muujinta sida loo dhaqan gelinayo mashaariicda u keenaya faa'idooyinka dheeraad ah bulshooyinka iyo deegaanka, oo ay ku jiraan ilaalinta iyo soo celinta dheeraad ah oo noolaha aaga wabiga
- Waxay adeegsan karaan xaqiijinta daadka si loo yareeyo waxyeelada iyo iibsashada suuragalka ah si loo ilaaliyo kaydka daadka

QORSHAHA IS ILAALINTA

Degmadu waxay ka fakaraysaa inay abuurto Qorshaha Maaraynta Waxyeelada Daadadka ee Marinka Wabiga Green kaasoo hagaaya maalgelinnada mustaqbalka si loo yareeyo khataraha daadka ee 30-50 sano ee soo socda. Si loo diyaarsho qorshe, qabyo **qoraalka bayaanka saamaynta barnaamijka deegaanka (PEIS)** ayaa la diyaarshay, wuxuuna diyaar u yahay dib u eegis iyo fikir ku biirin. Daraasadu waxay qiimaynaysaa sadex qaab oo kaladuwan oo lagu yareyn karo khatarta Marinka Wabiga Lower Green ayadoo haddana la bixinaayo dheefo muhiim ah:



Caddaaladda Deegaanka



Sinnaan iyo Caddaalad Bulsho



Ilaalinta deegaan iyo kasoo kabashada tiro yarida kalluunka salmon



Shaqooyin iyo nolol-maalmeed la heli karo



Ilaalinta Goobaha Banaan



Beereysi wax-soo-saar iyo waxtar leh



Dalxiiska iyo Dabiiciyada



Bulshooyin iyo nidaamka Noolaha Adkaysiga leh



Biyo nadiif ah oona la heli karo



Horumar waara

2019

BAAXADA HORE

- PEIS ayaa bilaabmay
- Baaxada hore
- Fikradaha laga dhiibtay qaababkii hore

2020

ILAASASHADA QAABKA KALE EE LA SAMEEYAY

- Degmadu waxay dejinaysaa jihada mashaariicda kale ee qaabka kale iyo mudnaanta
- Diyaarinta mudada cabirka oo dheeri ah

2021

MUDADA DHISIDA BAAXADA OO DHEERI AH

- Fikradaha laga dhiibtay qaababkii hore ee la muraajaceeyay

2022

DIYAARINTA PEIS-KA QABYO QORAALKA

- Qiimaynta lagu ogaanayo saamaynta ka dhalan karta qaab kasta
- Qeex faa'idooyinka badan ee laga heli karo

2023

QAYB QORAALKA PEIS REVIE

- Qabyo qoraalka PEIS ayaa lasoo saari doonaa si ay shacabku u akhriyaan
- Shacabku waxay ka faaloon karaan qiimaynta lagu sameeyay ikhtiyaarka kale ee dib u eegida lagu sameeyay

PEIS UGU DANBEEYA

- Faalooyinka ku saabsan Qabyo Qoraalka PEIS ayaa lagaga jawaabay oo qiimaynta waxaa loo sameeyay sidii la damaanad qaaday
- PEIS ka ugu danbeeya ayaa lasoo saari doonaa

TIXGELINTA GUDIGA

- Waxaa suurtagal ah:
 - Wuxuu xaqiijinayaa dookhee la xushay
 - Wuxuu hagayaa abuurista qorshaha

MARINKA MASHRUUCA

Marinka mashruuca waxaa ku jira ku dhawaad 21 mayl oo Wabiga Green ah iyo dhulka ku xeeran ayna ku jiraan qaybo kamid ah Auburn, Kent, Renton, SeaTac, Tukwila, iyo deegaannada miyiga ee Degmada King.



U dhow Dykstra Park intii lagu jiray daadkii 2020.



Hormarinta Beerta Downey Farm iyo Signature Pointe.




Qariirada ayaa muujinaya daadka laga filaayo marinka Lower Green inta lagu jiro mudada daadka ee 500 sano ah, ayadoo qulqulka wabiga lagu cabiray 18,800 oo kuubig fiid halkii sikiin ba (cfs). Heerkaan daadka ayaa leh suuragalnimad 6% inuu dhaco ugu yaraan halmar 30-kii sanaba.

Ma Jirto Xaalad Dhisme

18, 800 cfs – Ma jirto Fatahaad (Dhexdhexaad, 0,2 % AEP)

Cfs = fiid sadex jibaaran halkii sikiinba
AEP = cabirka xad dhaafka sanadkii

| | |
|------------------------------|-------------------------------|
| ● Cabirka Wabiga | Dhumucda Daadka (fiid) |
| □ Marinka Wabiga Lower Green | < 0.1 |
| | 0.1 - 0.5 |
| | 0.5 - 1 |
| | 1 - 2 |
| | 2 - 4 |
| | 4 - 6 |
| | 6 - 10 |
| | > 10 |



Heerrka I ee Agoosto 2022: King County, Northwest Hydraulic Consultants



NOO SHEEG SIDA AAD WAX U ARAGTO

Fikradaha aad noo sheegtaa waxa uu naga caawinayaa in aanu qorshayno badbaadada daadadka. Wixii macluumaad dheeraad ah, **wac (206) 263-0602**.

Fadlan nagula wadaag fikirkaaga!

limeel: lowergreensepa@kingcounty.gov

Boostada: King County Flood Control District
Ciwaanka: Michelle Clark, Mas'uulka Rasmiga ah ee SEPA

516 Third Avenue, Room 1200
Seattle, WA 98104

Ka qayb gal kulan soo socda:

Qabo LowerGreenSEPA.org
wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan fursadaha mustaqbalka.

Si aad u hesho turjumaad wac (206) 349-6361.

Informacion disponible en espanol; por favor llame al (206) 349-6361.

索取中國人版本的可用資訊;請撥打 (206) 349-6361.

Để xem thông tin bằng Tiếng Việt, xin gọi (206) 349-6361.

Имеется перевод этой информации на РУССКИЙ; обращайтесь по телефону (206) 349-6361.

Macluumaadka waxaa lagu heli karaa somaliyeed; Fadlan la hadal (206) 349-6361.

한국어로 정보를 확인할 수 있습니다. (206) 349-6361 로 전화하십시오.

Інформація доступна українською мовою. Зверніться за номером (206) 349-6361.

Available ang impormasyon sa Tagalog; pakitawagan ang (206) 349-6361.